# Xulashada Macluumaadka Codeynta Soocan

## Habka Codeynta Cusub ee 2011

Muddadii 2009, codbixiyeyaasha Saint Paul waxa ay ansaxiyeen habka Xulashada Codeynta oo ay ku dooranayeen duqa magaalada iyo guddiga dawladda hoose. Laga billaabo sannadkan, codbixiyeyaasha waxay kala xulan karaan illaa lix musharrax ee kala duwan si ay ku muujiyaan soocashada doorashadooda.

Guddiga Dugsiga Saint Paul waxay sii wadi doonaan codeynta qaabkii hore. Tartamada gudigga dugsiga waxa ay u yaallaan dhinaca ee warqadda codeynta. Waxaad dooran kartaa illaa 4 musharrax ee guddiga dugsiga.

## Sida loo Calaameeyo Warqaddaada Codeynta ee Guddiga Dawladda Hoose

Tallaabada 1

Qalinka mari **codsashadaada koobaad** adiga oo buuxinaya qaab-ukumeedka magaca musharraxaa xiga.

Tallaabada 2

Haddii aad samaysatay **codsasho labaad**, qalinka mari adiga oo buuxinaya qaab-ukumeedka magaca tartamahaas. Musharraxaan waa in uu **ka duwan yahay** midka koobaad ee aad horay u doorataY.




Tallaabada 3

Sidaan ku sii codee doorashooyinka kale ee dhimman, haddii ay weli wax kuu dhimman yihiin. Xasuuso wax hal mar ka badan in aadan xulan karin isla musharraxaa.

Waxa aad soocan kartaa illaa lix xulasho, ama wadarta tirada musharraxiinta tartamaya, hadba kan yar.

Shardi kugu mahaa in aad wax hal musharrax ka badan soocato.

## Qaladaadkan oo Kale ha Samayn!

**Ha dooran wax hal musharrax ka badan marka ay jirto in aad mid qura ka dooranayso**



**Isla musharraxaa wax hal mar ka badan ha dooran**



**Doorashadaada dhinaceeda ha ku qorin darajada**



Haddii aad hal qalad samaysay, garsooraha doorashada ka codsan in lagu siiyo warq kale ee coddhiibashada.

Codbixiyaasha maqan ha ka soo wacaan xafiiska Doorashada **651-266-2171** si loogu soo diro warqadda coddhiibashada cusub.

## Ku Guuleysashada Doorashada

Musharraxiinta waxa ay doorashada ku gulaysanyaan marka ay xulashada koobaad ku helaan tirada ugu badan ee codadka laga dhiibtay xafiiskaas, 50% + 1, habeenka doorashada. Codadka xulashada koobaad waxaa tirinaya qalabka yaalla rugta doorashada ay ka dhacayso. Habeenka doorashada, wadarta codadka waxaa laga heli doonaa internetka ee laga galo www.rcelections.org.

Haddii musharraxna aanu ku guulaysan tirada ugu badan (aqlabiyadda) xulashada koobaad habeenka doorashada, tirinta waxaa la sii wadaya Isniinta, Nofeembar 14.

Wareeg kastaba, musharraxa hela tirada ugu yar ee codadka, iyo lagu daro musharraxiinta kale ee xisaab ahaan aan marnaba raja lahayn in ay doorashada ku adkaan doonaan, magacyadooda meesha waa laga saarayaa. Codbixiyaasha musharraxooda xiga ee ugu xulasho welina tartanka ku jira ayaa lagu sii daraya wadarta codadkiisa uu musharraxaa horay u haystay. Warqadaha codbixinta ee aan lahayn codadka musharrax tartanka weli ku jira dhinac ayaa la iska dhigayaa.

Tirinta iyo qoondaynta waa ay u sii gudbaysaa wareegyo kale illaa musharrax uu tirada codadka laga bixiyay ugu badan uu ku guulaysto. Haddii laba musharrax ay isku haraan oo midkoodna aan gaarin tirada ugu badan (50% + 1) markaa musharraxa ugu codad badan ayaa guusha hananaya.

## Su'aalaha Wax Badan la Isweydiiyo

**S: Ma la iga rabaa in aan wax hal musharrax ka badan xusho marka aan codeynayo?**
J: Maya waxaa lagaa rabaa hal musharrax kaliya in aad ku doraato halkii fursad.

**S: Illaa intee musharrax ayaan xulan karaa?**
J: Waxa aad ka xulan kartaa kolba inta ay yihiin tirada musharrax ee warqadda codbixinta ku qoran, illaa lix musharrax.

**S: Ma yeelan karaa wax hal musharrax ka badan xulashada koobaad?**
J: Maya, waxa aad ku xulan kartaa hal musharrax halkii xulashaba.

**S: Musharraxa aan ka helo ma ku xulan karaa wax hal xulasho ka badan?**
J: Maya, waxa aad ku xulan kartaa hal musharrax mar qura.

**S: Musharraxiinta u taagan xubanha guddiga dugsiga ma xulan karaa?**
J: Maya, xubnaha guddiba dugsiga waxaa lagu dooranaya qaabki codbixinta ee horay u jiray.

**S: Ma dhici kartaa in aan xusho musharraxiinta gobolka isu taagi doona doorashooyinka 2012?**
J: Maya, xulashada codeynta waxa keliya ee laga isticmaalayaa musharraxiinta dawladda hoose ee St. Paul.

**S: Goormaan ogaan doonnaa cidda ku adkaatay doorashada?**
J: Musharraxa ku guulestay doorashada waxaa la ogaan doonaa habeenka doorashada la qabtay haddii uu musharrax uu ku helo aqlabiyadda xulashada koobaad Maalinka Doorashada. Haddii tiro dheeraad ah loo baadho, ogaanshaha guleystaha rasmiga kama dambayn doonto muddo laba toddobaad ee ka dambeeya taariikhda ay doorashada dhacday.

## Macluumaad Dheeraada Nagala soo Xariir:

elections@co.ramsey.mn.us
(651)266-2171

## Ama booqo

www.rcelections.org

Ramsey County

# Macluumaadka Xulashada Codeynta ee St. Paul




Waxaa soo Diyaariyay
Doorashooyinka Degmada Ramsey